

# U diyaarinta ilmahaaga qaliinka



Haddii ilmahaagu uu xanuunsan yahay ama ay xaaladdoodu is beddeshay qalliinka loo qorsheeyay ka hor wac (03) 9345 4193

## Waxa loo baahan yahay inaad u sheegto ilmahaaga inta aan la jiifin

Daacad noqo oo runta u sheeg—u sheeg ilmahaaga sababta cusbitaalka loo keenay si ay su'aalo u waydiiyaan.

Haddii ilmahaagu ka yar yahay lix sano, u sheeg laba maalmood ka hor. Haddii ay ka weyn yihiin lix sano, u sheeg toddobaad ama laba toddobaad ka hor.

## Daawooyinka

Ilmahaagu waa inuu sii wadaa qaadashada dawooyinkooda caadiga ah wakhtiga caadiyan ay qaataan haddii aanay si kale ay u codsan kooxda daawaynta ilmahaaga mooyee. Daawooyinka afka laga qaato waxa lagu qaadan karaa kabbasho biyo ah maalinta qalliinka.

Laba toddobaad qalliinka ka hor, jooji isticmaalka ibuprofen (tusaale. Nurofen), saliidda kalluunka, fiitamiinnada iyo wixii daawooyinka kale ah, inay tala kale ay kugula taliyaan kooxda daawaynta ilmahaaga mooyee. Wac (03) 9345 4193 haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Haddii ilmahaagu qaato dawooyinka dhiigga khafiifiya (sida aspirin, warfarin) fadlan la xiriir kooxda daawaynta ilmahaaga ugu yaraan laba toddobaad ka hor wakhtiga qalliinka ee ilmahaaga si aad u hesho qorshe lagu joojinayo daawooyinkan.

Maalinta qalliinka, soo qaado wixii daawooyin ah ama qalab caafimaad oo ilmahaagu ugu baahan yahay daryeelka maalinaha ah.

## U diyaargarowga joogitaankaaga cisbitaalka

Maalinta qalliinka, cunugaagu waa inuu xirtaa bijaamooyin ama dhar dabacsan oo aan lahayn jiinyeer, badhamada birta ama kuwa la isku riixo marka la xirayo.

Diyaarso bac/boorso ay ku jiraan dhar lagu beddesho oo adiga iyo ilmahaaga oo ay ku jiraan xafaayadaha iyo waxyaabaha musqusha, xitaa haddii ay u imanayaan qaliin hal maalin bas ah.

Hubi in ilmahaaga loo qubeeyay habeen ka hor ama maalinta qalliinka. Iska saar dhammaan waxyaabaha la isku qurxiyo, oo siib dahabka iyo cidiyaha waxa la marsado (sida shellac, SNS iyo acrylic). Qalliinka ka hor, cunugaaga waxaa looga baahan doonaa inuu gashado dharka isbitaalka si uu isugu diyaariyo masraxa.

Haddii ilmahaagu cabo caanaha la qaso, waxaad u baahan doontaa dhalo diyaarsan marka ay ka soo kacaan suuxinta. Soo qaado daasad caano ah oo aan furnayn haddii ilmahaagu habeen ku hoyanayo meesha.

Haddii ilmahaagu u baahan yahay cunto gaar ah (tusaale, xasaasi la'aan, kosher, khudrad) u keen cunto fudud qalitaanka ka dib.

Soo qaado Medicare kaarkaaga, macluumaadka caymiska caafimaadka iyo dukumeenti kasta oo sharci ah oo la xiriira ujeedooyinka fasax bixinta.

Haddii ilmahaagu u baahan yahay inuu ku hoydo, hal waalid ama daryeela ayaa inta badan jooji kara sariirta dhinaceeda.

Fadlan wac (03) 9345 6182 haddii hoy loo baahan yahay ka hor ama ka dib joogitaankaaga. Haddii ay suurtagal tahay, isku day inaad horay u sii diyaarsato qof kuu daryeela carruurtaada kale.

## Soonka iyo wakhtiga la soo xaroonayo

Xaruntayada qaabilaada (pre-admission clinic) waxay ku soo wacaysaa laba maalmood qalliinka ka hor si ay u bixiso tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan soonka iyo wakhtiga imaatinka. Carruurta xanuunsan ee qabta calaamadaha hargabka waxay la kulmi karaan halis weyn oo suuxdinta guud ah, waa qasab inaad u ogeysiisaa kooxda qaabileysa. Haddii ilmahaagu aanu u soomin sidii looga baahnaa, qalliinkooda ayaa dib loo dhigi karaa ama la baajin karaa.

## Maalinta qalliinka

Fadlan ka soo gal Xarunta Soo dhawaynta Qalliinka J (u qaado wiishashka cagaaran dabaqa 3 oo u leexo midig). Waqtiyada sugitaanku way kala duwanaa karaan. Shaqaalaha kalkaalisada ayaa kuu soo sheegi doona qiyaasta inta aad sugi doontid iyo inta ilmahaagu u baahan yahay inuu soomo.

Mararka qaarkood xaaladaha degdega ahi waxay saamayn karaan jadwalka qalliinkayaga. Tani waxay macnaheedu noqon kartaa in qalliinka ilmahaagu u baahan yahay in la joojiyo, laakiin taariikh kale ayaa la qorsheyn doonaa.

Iyada oo qayb ka ah habka caadiga ah ee gelitaanka ilmahaaga waxa laga yaabaa in wax laga weydiyo uurka waxaana laga yaabaa inaad u baahato baadhitaan uur qalliinka ka hor. Fadlan ogow, duubista iyo sawir qaadista lama oggola wakhti kasta goobaha caafimaadka (tusaale, tiyaatarada, soo kabashada iyo maalinta qalliinka).

## Baarkinka baabuurka iyo caawimaada safarka/guriga

Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay qiimaha baarkinka la dhimay haddii:

- aad haysatid kaarka lacag dhimista ee dawlada dhexe (tusaale. kaarka daryeelka caafimaadka)
- Ilmahaagu uu jifayo cusbitaalka in ka badan laba maalmood oo xidhiidh ah.

Haddii aad xaq u leedahay, usii qaado tigidhka gelitaanka iyo caddaynta xaq aad u leedahay baarkinka baabuurka iyo xafiiska amniga.

Haddii aad ku nooshahay in ka badan 100km meel u jirta isbitaalka, waxaad ka dalban kartaa kaalmada safarka iyo hoyga Qorshaha Caawinta Gaadiidka Bukaanka ee Victoria (Victorian Patient Transport Assistance Scheme - VPTAS). Nidaamyo la mid ah ayaa laga heli karaa gobolada kale.

## Akhri xaashida xaqiiqda ee Macluumaadka Caafimaadka Caruurteena (Kids Health Info fact sheet) Joogitaanka Cusbitaalka Ilmahaaga (Your Child's Hospital Stay)

Ma rabtaa inaad wax badan ka ogaato waxa dhacaya marka ilmahaaga la qalayo?

Sawir/iskan gareey koodka QR si aad u daawato *Hagaha Cunugga ee Cisbitaalka-Qalliinka Maalinta (A Child's Guide to Hospital—Day Surgery)* dhacdaas



Fadlan ku diiwaan geli ilmahaaga boggayga RCH ee halkan:  
<https://www.rch.org.au/my-rch-portal/>